Sharuucda Caawinta Maaliyadeed ee
North Memorial Health Hospital.
Ingiriisi - Guudmarka Luuqadeed Cad (PLS)

North Memorial Health (NMH) waxaa ka go'an in ay awood u siiso macaamiisheeda si ay u gaaraan caafimaadkooda ugu wanaagsan. Ballanqaadkan waxa ka mid ah in la siiyo kaalmo dhaqaale macaamiisha aan caymiska lahayn iyo kuwa aan caymiskooda hooseeyo marka awooddooda bixinta adeegyada ay caqabad ku tahay helitaanka daryeelka degdegga ah iyo caafimaadka lagama maarmaanka ah.

<u>Yaa u qalma kaalmada dhaqaale iyo waa maxay shuruudaha la iska rabo.</u>

Sharuucda Caawinta Maaliyadeed ee NMHs waxay bixisaa kaalmo maaliyadeed (daryeel samafal) dadka dakhligoodu hooseeyo, kuwa aan caymiska lahayn, ama kuwa aan caymiska lahayn kuwaasoo u baahan in laga caawiyo bixinta dhammaan ama qayb ka mid ah daryeelkooda caafimaad.

Macaamiisha NMH waxay xaq u leeyihiin kaalmada maaliyadeed ee NMH marka dakhliga qoyskoodu uu yahay ama ka hooseeyo 300% Heerka Saboolnimada Federaalka (HFS).

Codsiga kaalmada maaliyadeed waa in la buuxiyaa si loo go'aamiyo xaq lahaanshada qiimo dhimistan.

Macaamiishu waa inay la tashadaan la-taliyaha maaliyadeed ee ku sugan goobta soo socota si loo go'aamiyo u-qalmitaanka iyo caawinta codsashada kaalmada maaliyadeed:

- North Memorial Health Hospital – Kaalmo Dhaqaale, 3300 Oakdale Avenue North, Robbinsdale, MN 55422,
- Ama wac (763) 581-0911 ama (833) 494-2900.

Macaamiisha u qalma kaalmada maaliyadeed ee NMH laguma dalaci doono wax ka badan xadiga ay guud ahaan ku dallacaan (AGB) NMH si ay u helaan daryeelka degdega ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah macaamiisha leh caymis (AGB, sida lagu qeexay IRS Qaybta 501(r)).

Intaa waxaa dheer, NMH waxay ka qaybqaataan Daryeelka Shuraakada Sare. Barnaamijkan, NMH waxay iskaashi la samaysaa Adeegyada Bulshada Sare si ay uga tanaasulaan wada-jirka caymiska iyo lacagaha laga jarayo macaamiisha xubnaha ka ah Daryeelka Iskaashatada Sare U qalmidda barnaamijkan waxaa go'aamiya Iskaashatada Bulshada Sare.

NMH waxay kaloo siisaa qiimo dhimis aan caymis lahayn macaamiisha aan u qalmin kaalmada maaliyadeed oo dakhligoodu sanadlaha ka yar yahay $125,000. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhimista caymiska ee NMH fadlan wac (763) 581-0911, ama (833) 494-2900.

<u>Muxuu daboolaa barnaamijka kaalmada maaliyadeed?</u>

Sharuucda Kaalmada Dhaqaale ee NMH waxa ay khusaysaa adeegyada degdega ah iyo caafimaadka lagama maarmaanka ah ee ay bixiyaan isbitaalka NMH iyo xarumaha caafimaadka ee ku dhex jira nidaamka NMH, oo ay ku jiraan labadaba xarumaha iyo adeegyada xirfadeed ee ay bixiso North Memorial Health Hospital iyo Maple Grove Hospital, adeegyada hospice ee NMH, iyo adeegyada gaadiidka degdega ah ee NMH. U tixraac Sharuucda Kaalmada Dhaqaale ee NMH si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada la daboolay iyo kuwa aan la daboolin.

Sideen ku heli karaa nuqul ka mid ah Shuruucda Kaalmada Maaliyadda ama Codsiga?

Macluumaadka ku saabsan barnaamijka kaalmada maaliyadeed ee NMH, oo ay ku jiraan nuqullada Shuruucda Kaalmada Dhaqaale ee NMHs iyo codsiga kaalmada maaliyadeed, ayaa diyaar u ah dadweynaha lacag la'aan. Macluumaadkan waxaa lagu heli karaa mid ka mid ah hababkan soo socda:

- Nuqullada elegtarooniga ah waxaa laga heli karaa website-ka North Memorial Health: https://northmemorial.com/financial-assistance
- Codsiga boostada ee: North Memorial Health Hospital – Kaalmo Dhaqaale, 3300 Oakdale Avenue North, Robbinsdale, MN 55422;
- Adigoo wacaaya: (763) 581-0911, ama (833) 494-2900;
- Marka laga codsado goobahan soo socda:
    - Waaxda Diiwaangelinta ee North Memorial Health Hospital;
    - Waaxda Diiwaangelinta ee Maple Grove Hospital;
    - North Memorial Health - Kaalmo Dhaqaale, 3500 France Avenue North, Suite 106, Robbinsdale, MN 55422;
    - North Memorial Health Ambulance, 4501 68th Avenue North, Brooklyn Center, MN 55429.

Sideen u codsadaa?

Codsiyada dhammaystiran oo ay ku jiraan dhammaan macluumaadka loo baahanyahay iyo dukumentiyadda waa in loo gudbiyaa mid ka mid ah goobaha sare ama boostada lagu soo diro:

- North Memorial Health - Kaalmo Dhaqaale, 3500 France Avenue North, Suite 106, Robbinsdale, MN 55422.

Waxaan si degdeg ah eegis ugu samayn doonaa codsiyada lasoo gudbiyay oo wata dukumeenti taageeraya ,waxaana ku ogeysiin doonaa xaq u yeelashada kaalmada maaliyadeed si qoraal ah 30 maalmood gudahooda kadib marka la helo codsi dhammaystiran.

Ma tixgelin doono codsiyada aan dhamaystirnayn, laakiin waxaan ku ogeysiin doonaa codsadayaasha taleefoon ama boostada codsiga aan dhamaystirnayn iyo waxaan ku siin doonaa fursad aad ku soo dirto dukumeentiyada maqan ama macluumaad 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda ogeysiinta.

Ma jirtaa caawimo luuqadeed?

Turjubaano lacag laan ah ayaa kuu diyaar ah. Sharuucda Kaalmada Maaliyadda, codsiga, iyo Sharuucda oo kooban ayaa laga yaabaa inaad ku heli karto luqaddaada. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac (763) 581-0911 ama (833) 494-2900, ama booqo website-keena oo ah www.northmemorial.com/financial-assistance.

Ma u baahantahay caawinaad?

Caawinaad ama su'aalo ku saabsan habka codsiga, fadlan wac (763) 581-0911 ama (833) 494-2900 ama weydii inaad la hadasho lataliyaha maaliyadeed ee xarun kasta oo NMH ah.